

Xarun Kasoo-kabasho Musiibo (DRC) ee FEMA ayaa laga furey Londonderry

Release Date: Luulyo 28, 2023

Xarun Kasoo-kabasho Musiibo ayaa laga furi doontaa Londonderry markay tahay July 28 si ay uga caawiso dadka degan Vermont uu daadadka saameyey iney bilaabaan soo-kabashadooda. Si wadajir ah DRC, goob ku-meel-gaar ah oo la dhisey iyadoo iskaashanayaan Londonderry, gobolka Vermont iyo FEMA, ayaa ka caawin doona ka-badbaadayaasha iney codsadaan gargaar FEMA, ay dukumintiyo soo geliyaan loogana jawaabo su'aalahooda waji-ka-waji.

Xarunta Londonderry waxey ku taalaa:

Iskuulka Flood Brook
91 Vermont – 11
Londonderry, VT 05148

Xarumaha waxey aalaaba ka furanyihiin:

Waterbury Armory
294 Armory Drive
Waterbury, VT 05676

ASA Bloomer Building
88 Merchants Row
Rutland, VT 05701

Barre Auditorium
16 Auditorium Hill
Barre, VT 05641

Dhammaan waxey furanyihiin 7 maalmood asbuucii, 8 subaxnimo ilaa 7 habeenimo.



FEMA

Page 1 of 2

Dhammaan xarumaha ayaa isticmaali kara dadka naafanimada leh iyo baahiyaha shaqo, waxaana ku qalabeysan qalabka tiknoolajiyada wax caawisa. Haddii aad leedahay baahi qaabiltaan oo macquul ah ama turjume luuqada dhagoolaha, fadlan wac 833-285-7448 (riix 2 wixii Isbaanish ah).

Wakiilo ka socda Maamulka Ganacsi Yar ee Mareykanka (SBA) ayaa sidookale xarunta joogi doona si ay u sharaxaan sida loo codsado deymo musiibo oo ribacooda-hooseeya ee SBA oo loogu talagalay dadka guriyaha leh, kireystayaasha, ganacsiyada, iyo ururada faaiido doonka ahayn ee gaarka loo leeyahay, waxeyna bixinayaan macaluumaad ku saabsan dib-u-dhiska si guriyaha looga dhigo kuwo musiibo u adkeysta.

Uma baahnid inaad booqato DRC si aad u codsatid gargaar FEMA ah. Si aad isaga diiwaangelisid gargaarka FEMA, ka wac FEMA Leenka-Caawinta **1-800-621-3362**, onleenka aad [DisasterAssistance.gov](https://www.disasterassistance.gov) ama lasoo dag [Apka FEMA](https://www.fema.gov). Haddii aad isticmaashid adeega isku-duwida sida adeeg isku-duwid muuqaal (VRS), adeeg taleefon ee qoraal leh ama waxkale, usii FEMA taleefonkaaga adeegaas markaad codsanaysid.

FEAM waxaa ka go'an inay xaqiijiso gargaar musiibo ay weheliso sinnaan, takoor la'aan si ku salaaysan midab, kalar, diin, dhalasho, jinsi, da', naafanimo, garashada Ingiriiska, ama xaalad dhaqaale. Ka badbaade kasta ee musiibada ama xubin bulshada ah ayaa lasoo xiriiri karta Xafiiska Xuquuqda Rayidka ee FEMA haddii ay dareemaan iney yihiin dhibane takoor. Xafiiska Xuquuqda Rayidka ee FEMA waxaa lagala soo xiriiri karaa si bilaash ah 833-285-7448. Waxaa diyaar ah hawlwadeeno dhowr luuqadood ku hadla.



FEMA

Page 2 of 2